



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WARSAXAAFADEED 013/2011**

### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud oo soo dhoweeyay dhaarinta Golaha Wasiirada cusub**

Nayroobi, 29 Luulyo 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa soo dhoweeyay sida degdegga ah ee uu Baarlamaanku ugu ansaxiyay Golaha Wasiirada cusub ee Soomaaliya, amrkii dambena lagu dhaariyay shaleyto Villa Soomaaliya.

“Waxaan aad ugu faraxsanahay in Baarlamaanka Soomaaliyeed uu si dhakhso ah u hawlgalay una ansaxiyay xukuumadda Ra’iisal Wasaaraha, taasoo ku dhacday muddadii lagu tilmaamay Heshiiskii Kampala”, ayuu yiri Mahiga. “Arrintan waa tallaabo waxtar leh oo muujinaysa billowga fiican ee xukuumadda cusub. Sidaa darteed, xukuumaddu waa inay si dhakhso leh wax uga qabataa hawlaha muhimka ah, iyadoo maanka ku haysa aragti qaran oo ku saleysan habkii wadahal ay kula yeelan lahayd dhammaan qaybaha arrintu khusayso. Waana inay xoogga saartaa adeegga dadweynaha”.

Dr. Mahiga wuxuu kaloo ugu baaqay dowladda inay si dhakhsa ah u bilowdaa hirgelintii Heshiiskii Kampala – gaar ahaan ansaxinta Qorshe Hawleedka 12ka bilood ee soo socda, taasoo ay ka mid yihiin diyaarinta iyo ansaxinta dastuurka iyo xasilinta arrimaha amaanka dalka. Wuxuu kaloo ugu baaqay xukuumadda inay si dhakhsa leh ula meeldhigto Bulshada Caalamka goobta iyo waqtiga la qaban lahaa kulankii wadatashiga, kaasoo la doonayo inuu dhaco ka hor intaan la qaban shirka heerka sare ee qorsheysan looga tashanayo arrimaha Soomaaliya dhici doonana inta uu socdo kalfadhiga Golaha loo Dhanyahy ee Qaramada Midoobay kaasoo ku beegan bisha September 2011.

“Waxaa muhiim ah inaan meesha ka sii wadno wixii horumar ah ee la gaaray”, ayuu yiri Dr. Mahiga. “Xukuumadda waxaa hadda la soo gudboonaatay caqabad aad u adag, waxaana u kulmay xaalad baniadanimoo oo aad u adag iyo qalalaasooyin siyaasadeed oo fara badan, iyadoo isla markaana Muqdisho dagaal kula jirto kooxaha argagaxida. Dowladda Federaalka KMG waxay u baahantahay inay taageero cusub ka hesho bulshada

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

caalamka maalmaha adag ee soo socda. Waa inay muujisaa siday uga go'antahay inay wax ka qabato baahida degdegga ah ee dadweynaha”.

Kadib markuu ka qaybgalay kulankii degdegga ahaa ee heerka wasiir loogana hadlayay arrimaha Geeska Afrika ay soo qabanqaabisay Hay'adda Cuntada iyo Beeraha qaabilsan (FAO) kana dhacay Roma, Talyaaniga, Isniintii dhowayd, ayuu Dr. Mahiga la hadlay jaaliyadda Soomaaliyeed ee Talyaaniga wuxuuna u sheegay in caqabadaha jira ay yihiin kuwo culus laakinse laga guuleysan karo haddii madaxda Soomaaliyeed ay muujiyaan midnimo. Dr. Mahiga ayaa mar labaad ugu celiyay bulshada caalamka inay si dhakhsa leh uga jawaabto codsigii gargaarka wax ka qabashada dhibaataada baniaadanimo ee Geeska Afrika, gaar ahaan tan Soomaaliya ka jirta.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback / Susannah Price

Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6898/ 6805 ama +254739976888 / 0733902020

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website)

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)